Qoyska Xaanshida Xaqiiqada

# Natiijada Togan:

## Ogeysiinta Natiijada Dhiigga Laga Qaaday Ciribta

Barnaamijka Baaritaanka ilmaha dhasha ee Minnesota

**Absent/Reduced GALT, Family Fact Sheet—Somali**

# Galactose-1-Phosphate Uridyltransferase Maqan/Yaraatay (GALT)

## Maxaa lagu ogaaday baaritaanka dhallaanka cusub?

Baaritaanka ilmaha dhashay oo la sameeyay ayaa lagu ogaaday in ilmahaagu qabin ama uu qabo heerarka hooseeya ee maadada enzyme oo la yiraahdo galactose-1-phosphate uridyltransferase (GALT).

## Maxay tani ka dhigan tahay?

Maqnaanshaha ama heerarka hooseeya ee GALT ayaa muujin kara in ilmahaagu qabi karo cilada yaraanta galactosemia. Natiijada laga helay ayaan ka dhignayn in ilmahaagu qabo galactosemia, laakiin baaritaan ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo.

## Maxaa xiga oo dhici kara?

Dhakhtarkaaga ayaa kaa caawin doona diyaarinta baaritaanka dheeraadka ah oo ay sameeyaan taqasusleyaal aqoon u leh galactosemia. Taqasusleyaasha ayaa doonaaya inay arkaan ilmahaaga sida ugu dhakhsaha badan si loo baaro.

Taqasusleyaasha ayay u badan tahay inay doonayaan inay ilmahaaga u badelaan caanaha ka samaysan sooyada maadaama caanaha naaska iyo caaneyaasha lo'da ay sababi karaan dhibaatooyin caafimaad oo ku dhaca ilmaha qaba galactosemia.

## Waa maxay galactosemia aasaasiga ah?

Galactosemia aasaasiga ah waa xanuun ay qabaan ilmuhu marka ay dhashaan markaas oo uusan ilmuhu awoodin inuu adeegsado sonkorta caanaha oo la yiraahdo galactosegalactose. Galactose ayaa ka timaada cuntada, ayna ku jiraan caanaha naaska, dhammaan maadooyinka caanaha, iyo caano boreyaasha badan ee ilmaha. Erayga 'galactosemia' waxaa laga wadaa galactose badan oo ku jirta dhiiga.

## Waa maxay dhibaatooynka caafimaad ee uu keeni karo?

Xanuunka galactosemia waa xanuun qofku abidkiis qabaayo. Haddii aan la dawayn, wuxuu sababi karaa:

- Cunto cunis xun iyo miisaan koror
- Awood darro
- Juudaanka (maqaarka ama qaybaha cad ee indhaha oo jaalle noqda)
- Waxyeelada beerka
- Waxyeellada maskaxda
- Caabuqyada bakteeriyada xad dhaafka ah (sepsis) kuwaas oo loo dhiman karo

Carruurta qaba galactosemia ayaa ka faa'iideysan kara daawaynta degdega ah ee taxadarka badan.

## Waa maxay fursadaha daaweynta ee jira?

Inkasta oo aan galactosemia daawo lahayn, haddana waa la maarayn karaa. Daawada ugu badan waa badelidda cuntada si looga fogaado dhammaan maadooyinka caanaha. Haddii la daweeyo kahor inta aan astaamuhu soo muuqan, ilmaha ayaa heli kara kobac iyo koriimo caafimaad leh.

Ilmaha qaba galactosemia aasaasiga ah waa inay u tagaan dhakhtarka guud iyo taqasuslaha dheefshiidka.

## Dhigaalada

**Tixraaca Macluumaadka Hiddo-sidaha:**
http://ghr.nlm.nih.gov

**Badbaadi dhallaankaaga Adoo U Maraya Baaritaano Aasaasi ah:**
www.savebabies.org

**Baaritaanka Koowaad ee Dhallaanka:**
www.babysfirsttest.org